RED/HA/ ____305___2/22

Date: Feb-13-2022

**UJEEDDO: CADDEYN HESHIIS LABA DHINAC**

Waxa manta oo ay taarikhdu tahay **14-Feb-2022** ka qabsoomay nootaayada horteeda caddeyn labo dhinac ah

**Qodobka Dhinaca 1aad**

Anigo ah **Maxamed Cali Cabdi** waxaan qoraalkan sharciga ku cadeynayaa in dhul cabirkiisu ahaa **48x18m** kuna yaala **Degmada /Axmed Dhagax** Xaafada **Masallaha File No:68161** oo uu iga iibiyay **Siciid Daahir Aw siciid** aanu labadayaduba ka laabanay heshiiskii iibka dhulka ee ku caddaa nootaayada **Macalin , Hargeysa** tixraaceeduna ahaa **XNM/H/25368** waxaan sido kale halkan ku caddeynayaa in uu ii celiyay lacagtii iibka dhulkaas oo dhamaystiran cadadkeeduna ahaa **33,000(Saddex iyo Soddon kun oo Dollar)** taarikhdu markey ahayd **2-Dec-2021** isna raali ku yahay kuna qanacsan yahay .

**Maxamed Cali Cabdi 063-4066493** ____________

Anigo ah **Siciid Daahir Aw siciid** waxaan qoraalkan sharciga ah ku caddeynayaa in aan u celiyay **Maxamed Cali Cabdi** lacagta iibka dhulka fahfaahintiisu kor ku xusan tahay waxaanan u celiyay lacagtii oo dhamaystiran taarikhdu markey ahayd **2-Dec-2021** wax iigu hadheyna majiraan waxaanan sexeexay qoraalkan anigo oo xor ah miyirkeyga iyo maankeygaba qaba kuna hor sexeexay nootaayada horteeda .

**Siciid Daahir Aw siciid 063-3867395** ____________

**Markhatiyaal**

**1.Maxamed Warsame Ducaale 063-3147756** ____________

**2.C/raxmaan Cabdalle Cabdulaahi 063-4881906** ____________

## CADDEYN NOOTAYO .

Waxaan Cadeynaynaa In Hortayada Lagu Saxeexay Heshiiskan Caddeynta Dhulka ah Maanta Oo Ay Bishu Tahay **14/Feb / 2022** Saxeexyada Ku Yaalana Yihiin Kuwii Labada Dhinac .Sidaa Darteed Waa Heshiis Sugan .

**X - C/QAADIR JAAMAC XAAMUD**

SARK.NOOTAAYADA SHARCIGA AH Hamud P.NOTARY

HAMUD★NOOTAYADA SHARCIGA AH EE

# Jamhuuriyada somaaliland

27/02/2022

Ku:Xoghayaha Dawlada hoose

Ujeedo:Codsi

Mudane xoghaye anigo ah muwadinka magaciisu hoos ku xusan yahay waxaan ku soo gudbistay markay taarikhdu ahayd **30/10/2021** codsi joojin file **tr:18798** kaas oo si been abuur ah la iga dhigay iibiye anan waxba ka ogayn sida ku cad notayada **ref:xnsah---863/2021** fileka waxaan u hibeeyay muwaadinka magaciisu yahay **siciid daahir siciid** sida ku cad nootayada sumadeedu tahay **ref:xnshi/12/2021.**

Hadaba isaga oo an u dhamays tirnayn sifihi sharci ee hibaynta inu ka iibiyay muwadinka magaciisu yahay **maxamed cali cabdi** sida ku cad nootayada sumadeedu tahay **ref:xnm/h/25368** muwankaasina uu sifo aan sharci ahayn iigu qorayn iibiye si uu uga dhuunto cashuurti ku waajibi lahayd.

Sidaasi darted mudane waxaan ka codsanaya inaad u ogolaato inu filekisa wato muwadin siciid daahir siciid maadama uu o dhamaystirtay sifihi sharciga aha ee hibaynta sida ku cad warqada maxkamada ee sumadeedu tahay **mdh/cl/88/2022**.

Dhinaca kalana ay iibki ku kala noqdeen labada dhinac **maxamed cali cabdi** iyo **siciid daahir siciid** siday ku cadeenayan nootayada sumadeedu tahay **red/ha/305/2022**

## Alle mahad leh

**Codsade: Siciid Xasan Muxumed**______________

H-dhawrka, DHH
Ka soo baadh, Kasi
Kaasi, warbixin
Ka keen

07-03-2022

Republic Of Somaliland
Hargeisa Municipality

Jamhuuriyada Soomaalila
Dawlada Hoose Ee Harga

**DEGMEDA AXMED DHAGAX** **3/09/2024**

**Ku,Gudoomiyaha Gudida Hubinta D H H** **HARGAYSA**

**Mudane gudoomiye,**

Waxa aan warbixintan kugu soo gudbinayaa faylka uu asalkiisa ku qoran yahey Siciid Xasan maxamed ee ku yaala Degmadda **A/dhagax** Gaar ahaan **Masalaha, Beerta ilma daahir aw siciid** oo ah fayl kusoo baxey Danguud **F/No=68161 C/N0=14793**.

Intaas kadib mudane Gudoomiye macmiilka magaciisu yahey **Siciid Xasan Maxamed** waxa uu laba baloodh oo dhulkaas ka mid ah u hibeeyey macmiilka magaciisu yahey Siciid Daahir Siciid taas oo kasoo baxdey **Maxkamada Degmadda Hargeysa** tixraaceedu yahey **MDH/CL88/2022** taariikhdu markey aheyd **13/02/2022**,dhulkaas oo jihooyinkiisu yihiin.

**Koonfur=Waddo** **Bari=Waddo** **Galbeed=Dhisme** **Waqooyi= Waddo.**

Mudane gudoomiye dhulkaas waxa dhisan baloodh ka mid ah oo wajahad ku leh waqooyi iyo bari halka ay dhisme ka tahey galbeed iyo koonfur.

Intaas ka dib mudane gudoomiye waxa jira file kale oo leh **TR-18798** oo uu ku qoran yahey Maxamed Cali Cabdi oo cabir kiisu dhan yahey **18x48** oo wajahad ku leh Bari, Koonfur iyo Waqooyi halka ay dhisme ka tahey galbeed oo kaliya.

Hada mudane gudoomiye labadaas macmiil kor ku kala xusan ee kala **ah Siciid Daahir Siciid** iyo **Maxamed Cali Cabdi** waxa ay yihiin file u haystaan laba goobood oo isku mid ah.

Sidoo kale mudane gudoomiye goobtaas markii aan hubiyey cida leh waxa aan helney nootayo sharci ah oo laga qorey Xafiiska Haamud ee tixraaceedu yahey RED/HA/305/2/22 kuna taariikheysan 13-feb-2022 taas oo u dhigan ka laabasho dhinaca **Maxamed Cali Cabdi – 063-4066493**, ka degmo ahaan waxa aanu hubin rasmi ah ku sameyney in **Maxamed cali Cabdi** Dhulkaas ka madax banaan yahey oo aanu laheyn dhulka faahfaahintiisu sare ku xusan tahey ? **Maxamed Cali Cabdi** waxa uu noo cadeeyey in uu dhulka faahfaahtiisu sare ku xusan tahey in uu ka Madax banana yahey oo aanu goobtaasi lahey.

Sidaas darted mudane gudoomiye waxa aanu soo jeedineynaa in la tirtiro fileka leh **TR-18798** oo uu ku qoran yahey **Maxamed Cali Cabdi** oo cabir kiisu dhan yahey **18x48** oo wajahad ku leh Bari, Koonfur iyo Waqooyi halka ay dhisme ka tahey galbeed oo kaliya, si loogu soo saaro mulkiyada macmiilka magaciisu yahey Siciid Daahir Siciid.

F.G= Goobtan waxa hore uga warbixiyey Xafiiska Hanti-Dhawrka D.H.H taariikhdu markey aheyd **9/march/2022.**

**Cisman C/ladiif Cismaan ............**

**Madaxa Qorshaha degmeda axmed dhagax**

XAFIISKA HUBINTA & DABAGALKA DHULKA

Madax Qorshaha

4/9/24

Go'aan Lr: 975/2024 Date: 09 September 2024

**Go'aan Guddi Fulneed:**

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 09 September 2024 shir Gudoomiyena ka ahaa Duqa çaasimadda JSL (MD C/kariim Axmed Mooge), Kuna saabsanayd Cancell gareen fayl (Tirtirid), Dood iyo falan qayn dheer ka dib.

**Wuxuu Go'aansaday:-**

Markuu Arkay:- Sharciga Wasaaradda Arrimaha Gudaha Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL.

Markuu Arkay:- Warqada ku taariikhaysan 03 September 2024 ujeedadeeduna tahay Tirtirda File, Kana soo baxdey Madaxa Qorsheynta Degmadda A/dhagax.

Markuu Arkay:- In Muwaadinka magaceesu yahay (Maxamed Cali Cabdi) oo leh dhulka cabirkiisu yahay 18x48m kuna yaalay Degmadda A/M/Haaruun ay waddo martay lehna TR/No 18798.

Markuu Xaqiiqsaday:- Inay lagama maarman tahay in la Cancell gareeyo faylka sare ku xusan Maadaama uu ka madax-banana yahay dhulkaasi danta-guud ah.

Markuu Tixgaliyay:- Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso

**Gudiga Fulintu:-**

Kadib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan guddida fulintu wuxuu go'aansaday in la Cancell gareeyo (Tirtiro) faylka sida qaldan loogu adeegsaday dhulka ay isu hibeeyeen (loo hibeeye Siciid Daahir Siciid) (Hibeeyey Siciid Xasan Maxamed) dhulkaasoo cabirkiisu yahay (24x18m) Kuna yaala Degmada A/dhagax, Hadaba faylkaasi kor ku xusan waa in sharciga loo raaco lana cancel'gareeyaa TR'kiisuna yahay 18798, Taasoo uu cadeedey muwaadin Maxamed Cali Cabdi inuu dhulkaasi ka madax banana yahay.

(Siciid Nuur Aw Jaamac)
Xoghayaha Fulinta D/hoose Harg ahna
Xoghayaha Golaha Degaanka Hargeysa.

(Khadar Axmed Cumar(Khadar Nuur)
Ku Xigeenka Duqa Caasimada ahna
Gud/Xigeenka Golaha Deegaan Harg

(C/kariin Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargaysa ahna
Gud.Golaha Deegaanka Hargaysa